



Walwal ma ka qabtaa xaalad aan ammaan ahayn? SafeOregon ayaa bixisa hab fudud oo lagu soo sheego

Ilaa iyo intii la aasaasay, SafeOregon waxay noqotay hab lagu kalsoonaan karo oo loogu talagalay ardayda, qoysaska iyo xubnaha bulshada ka tirsan si ay soo sheegaan xaaladaha aan ammaanka ahayn. Tan iyo Simtambar 2017, markii ay Dugsiyada Dadweynaha Portland bilaabeen ku dhiirrigelinta bulshadeeda in ay isticmaalaan khadka talada, degmadu waxay heshay 259 xiriir la soo sameeyay oo la isku siinayo macluumaad saabsan arrimo kale duwan.

"Waan ognahay in talooyinka dhanka ammaanka ay heleen ciidamada fulinta sharciga, waxaan awoodnay in aan yareyno dhibaata jirta iyada oo guul laga gaarayo waxyaabaha jira, la isku xirayo kooxaha dhanka maamulka iyo la-talinta, waalidiinta iyo ardayda si isla markiiba loo gudda gala wax ka qabashada dhibaata jirta isla markaana dadka loogu xiro ilaha ku habboon," ayuu sheegay Sgt. Jim Quackenbush oo ka tirsan Xafiiska Booliiska ee Portland Qaybtiisa Adeegyada Dhallinyarada. "Waa hab wanaagsan, gaar ahaan marka la eego dadka raba in magacoodu qarsoodi noqdo ama walwal ka qaba dhibaato joogto ah oo lagu hayo isla markaana aan hubin halka ay tahay in ay aadaan ama cid ay la hadlaan."

Waxaa maalgeliyay Sharci dejinta Oregon iyada oo uu qayb ka yahay dadaalka gobolka oo dhan ee lagu wanaajinayo ammaanka, SafeOregon waxay bixisaa hab iyada oo aan magac la socon oo lagu soo sheego walwalka la qabo sida hanjabaadaha rabshadeed, dagaalka, daroogo iyo aalkolo, hub, xoog isku muquunin, dhibaateyn, cabsigelin, ama waxyeellada qofku isku geysto. Nidaamka waxaa laga heli karaa iyada oo la adeegsanayo:

- Badhanka ay ku qoran tahay "Report unsafe behavior" oo laga helayo website kasta oo ay leeyihiin dugsiyada PPS
- [Website-ka SafeOregon](#)
- Wicitaan toos ah/farriin telefoon (844-472-3367)
- Email loo dirayo tip@safeoregon.com
- [1]Nidaamka la isticmaalo telefoonka gacanta 'mobile app' ayaa laga soo dejin karaa/min-guurin karaa telefoonka casriga ah ee gacanta Telefoonkaaga Casriga ee Gacanta iyada oo la isticmaalayo iTunes ama Google Play

Xogta laga helay labadii sano ee u horreeyay ee SafeOregon lagu isticmaalay PPS waxay muujisay natiijooyin badan oo kale duwan. Tusaale:

- 36.7% oo ah xiriirada la soo sameeyay ee macluumaadka la isku siinayo waxay ka yimaadeen ardayda; 31.7% waxay ka yimaadeen waalidiinta

- 59% oo ah xiriirada la soo sameeyay ee macluumaadka la isku siinayo waxaa lagu soo gudbiyay dhanka internet-ka, 17% dhanka email-ka, 10.8% dhanka telefoonka 6.6% iyada oo isticmaalayo Nidaamka SafeOregon iyo 6.2% iyada oo la isticmaalayo farriinta dhanka telefoonka
- Xoog isku muquuninta/is-dhibaateynta ayaa ahaa kuwa ugu badnaa dhacdooyinka la soo sheegay oo ah 23.8%, oo ay soo raacaan haysashada, isticmaalka ama qeybinta mukhaadaraadka (10.7%), qof ku hanjaba in uu is-dilayo oo ay soo sheegeen dad kale (5.5%), cabashooyinka dhanka dugsiga (5.2%)
- 73% oo ah xiriirada la soo sameeyay ee macluumaadka la isku siinayo waxaa loo kala saaray/qaaday in ay yihiin kuwo caadi ah oo (dhex maray arday isku fac ah) oo sida caadiga uu wax ka qabto dugsigu, sida muranka, ku xadgudubka xeerka, iwm.), 13.9% waxaa loo kala saaray/qaaday in ay yihiin (dhacdooyin hadda jira ama hore u dhacay oo ay tahay in degdeg wax looga qabto, waxyeellada qofku isku geysanayo, falal dambiyeedyo, ay si aad ah suurtagal u tahay in ay mar kale dhacaan), 0.4% waxaa loo kala saaray/qaaday in ay yihiin kuwo aad muhiim u ah in wax laga qabto (dhibaato degdeg ah oo halis ah oo soo fool leh, suurtagalnimada waxyeello uu qofku isku geysto ama falal dambiyeedyo

Si hadalka loo sii gudbiyo oo dadka la gaarsiiyo waxyaabo ku saabsan ilahani, PPS waxay jeclaan lahayd in ay dadka la wadaagto meelaha laga sii gelayo buug-yaraha SafeOregon oo ku qoran Ingiriisi iyo sidoo kale shanta luqaddood ee ay taageerto degmadu ee hoosta ku qoran.

[SafeOregon – English](#)

[SafeOregon – Isbaanish ah](#)

[SafeOregon – Vietnamese](#)

[SafeOregon – Chinese](#)

[SafeOregon – Russian](#)

[SafeOregon – Soomaali ah](#)

Fadlan xiqiiji in aad macluumaadkan la wadaagto asxaabtaada iyo qoyskaaga – waxaanad xasuusisaa ardaydaada: Haddii aad wax aragto ama maqasho, wax dheh - si dhakhso ah. Aanu ka wada shaqeyno in aad bulshadeeda ka dhigno mid badbaado leh.